



UJEEDO: JAWAAB CELIN.

REF:-533/T.P.N/2023,

Tr.14/02/2023.

Anaga oo tixraacayno warqada Sumadeedu tahay SUM:XXIG/310/2023, kuna Taariikhaysan 14/02/2023, kana soo baxday Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka uuna Saxiixay Ku Xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka Jibriil Jirde Cabdi, kuna saabsanayd Soo Caddeyn Dukuminti.

Hadaba Aniga oo ka Jawaab Celinaya Warqada Caddeynta ee Lambarkeedu yahay:-347/T.P.N/2022, Tr.17/08/2022, kana soo baxday Xafiiskayga Nootaayo Tayo, Cadentaas oo ku saabsanayd Mudo Qaadasho oo Mudane C/Ilaahi Xasan Axmed, uu Ku Balan qaaday Mudo Ku Siman 15-09-2022 uu Saciido Muuse Aadan oo uu Wakiil u yahay Muuse Xuseen Maxamuud uu Ku Siinayo Dhul Ama Lacag.

Waxayna Nootaayadu ka saxiixday C/Ilaahi Xasan Axmed Diiwaanka iyo Warqada Cadeynta isagoo ka fiyow dhanka Maskaxda iyo Caqligaba Cid qasabtayna aysan jirin, Waxaana Markhaatiyaal Ka ahaa Cadeyntaan

1-Ismaaciil Xasan Max'ud 2-Liibaan Mire Xasan 3-C/qaadir Cali Aadan 4-C/risaaq Cali Diiriye, Hadaba ka Nootaayo ahaan Waxaan caddeynayaa in Dukumintigaan Cadeynta Mudo Qaadashada uu yahay Mid sax ah, oo Xafiiskeyga Ka Soo Baxday, Diiwaanka Nootaayadana Ku Jira.

=SAXIIXA CADDEEYAHA=

Dr.Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"



**UJEEDO: ("HESHIIS CADDEYN MUDO QAADASHO")**

**\_Muqdisho:** Maanta oo ay taariikhdu tahay **17/08/2022**, waxaa Xafiiska Nootaayo Tayo ee **Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, hor yimid labada daraf ee hoos ku xusan, Waxayna Caddeeyeen Sidatan:

anigo ah **C/Ilaahi xasan axmed** soomaali ah dhashay 01/01/1987 lehna warqad aqoonsi number(license) 1023.

Waxaan caddenayaa dhulkii aan ka iibsaday **Siciid maxamed xasan axmed** oo ku yaal deyniile goofka reer Maxamed colow cabarkiiisuna yahay 20x15 lotto numberkiisuna yahay(6732) siciidna uu kasii iibsaday **Siciido muuse aadan** uuna ka siistay lacag dhan (\$13,000) saddex iyo toban kun oo dollarka mareykanka ah iyo (\$1,000) oo qarash ah

Dhulkaas oo loola yimid dukumiinti kale sidaas ayuuna ku noqday labo dukumiintile arinkaas oo dib igu Soo noqday aniguna waxaan balan qaadayaa inaan siiyo **Siciido muuse aadan** dhul nadiif ah ama Qarashkii ka baxay kuna wareejin doono wakiilkeeda muuse xuseen maxamuud mudo ku siman 15/09/2022 ayadoo wax muddo danbe ah anan qabsan doonin maadama aan iska daba joognay mudo Gaareysa 2 bilood.

**CADEEYE**

C/LAAHI XASAN AXMED



1-ISMAACIIL XASAN MAX'UD AHNA DAMIINKIISII HORE



3-C/QAADIR CALI AADAN



Rep. 347/TPN/2022

**MARKHAATIYAAL**

**LOO CADEEYE**

MUUSE XUSEEN MAXAMUUD



2- LIIBAAN MIRE XASAN



4-C/RISAAQ CALI DIIRIYE



Tr.17/08/2022

(CADDEYN TA NOOTAAYAHA)

Anigoo ah Nootaayaha Tayo, **Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, waxaan qoraalkaan ku caddeynayaa in Saxiixyadda sare yihiin kuwii saxda ahaa ee 1-)C/LAAHI XASAN AXMED , Ahna (cadeeye) 2-)MUUSE XUSEEN MAXAMUUD Ahna (loo cadeeye), iyo afarta Markhaati ee sare ku xusan, dadkaan oo aan anigu aqoonsaday hubiyeyna in ay magacyadaas leeyihiin, Waxay caddeyntaan igula Saxiixeen Xafiiskayga ayaga oo xis qaba Cid qasbaysana aysan jirin, waana caddeyn Heshiis Dhoof oo ansax ah oo waafaqsan sharciga.

**NOOTAAYAHA**

**Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**

**MASAWIRKA CADEEYAHA**

C/Ilaahi Xasan Axmed



**MASAWIRKA LOO CADEEYAHA**

Muuse Xuseen Maxamuud



**MASAWIRKA DAMIINKA**

Ismaaciil Xasan Maxamuud



**=MARKHAATIYAASHA=**

Liibaan Mire Xasan



C/qaadir Cali Aadan



C/risaaq Cali Diiriye





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



SUM: XXIG/310 /2023

TR: 14 / 02 /2023,

**Ku: Maamulaha Nootaayadda Tayo**

**Muqdisho,**

**Ujeedo: Soo Cadeyn Dukuminti**

Si loo gaadho xaqiiqada dhabta ah loona waafajiyo caddaalada ayaa waxaa maamulaha **Nootaayo Tayo** la farayaa inaad soo xaqiijiso, isla-markaana soo caddeyso dukumintiga hoos ku qoran inuu yahay mid sax ah oo ka soo baxay nootaayadaada, diwaankaagana ku jiro oo laga heli karo.

**Ref: 347/TPN/2022, 17/08/2022 oo ah heshiis caddeyn mudo Qaadasho"**

Hadaba waxaa maamulaha **Nootaayo Tayo** laga doonayaa in jawaabta cadeynta dukumintigaas sida ugu dhakhsiyaha badan noogu soo gudbin doonto.

Jibriil Jirde Cabdi

Ku Xigeenka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

SOMALIA



Address: Somalia, Mogadishu, Hamar Weyne District, London Road

Website: <https://www.ago.gov.so> Email: [info@ago.gov.so](mailto:info@ago.gov.so) , [ag@ago.gov.so](mailto:ag@ago.gov.so) , [agosomalia@gmail.com](mailto:agosomalia@gmail.com)

Tel: +252 617 747770, +252 1 866146, P.O.BOX 86

## FOOMKA BIXIN WARQAD JAWAAB CELIN

REP. 533 -2023.

Tr, 14/2 /2023,

Magaca qaadaha:

Waxey gaarkey ciidki ay fureyso

Meeshuu deganyahay

Dowladda Hoose ee Xamar

Telfoonkiisa:

~~Waxaa loo diray xeer ilaalinta  
gum & ee garanba soomaaliga~~

SAXIIXA QAADHA:

SAXIIXA BIXIYAHA:

Sayid-cali cillaal

